Xeerka Anshaxa

GuidePost
Working Together With Integrity

AKHYAARTA SHARAFTA LAHOOW:

Sida aad ushaqayno waa muhiim. Waxaan utaaganahay inaan si buuxda ugu dhaqano sharciyada iyo xeerarka laxariira shaqadeena (sida iskaba cad!), laakiin si taasoo kale muhiim u ah—qaab hufnaan iyo badqab leh. Waxaan qadarin iyo amaano siinaa dadka shaqadu naga dhaxayso anagoo waxa saxda ah samaynayna maalin kasta.

Himilooyinkaan waxaa lagusoo koobay Xeerkeena Anshaxa. Fadlan waqti gali sidaad ulaqabsan lahayd Xeerka. Hadaad lakulanto wax dhibaato dhanka anshaxa ah, sida dhamaanteen naqabsata mararka qaar, waxaan kugula talinaynaa inaad latashato Xeerka aadna caawimaad karaadsato mid kamid ah adeegyada liiska kujira. Hakacabsan inaad waydiiso su'aalo ama aad sheegto walaacyada aad qabto. Hadaad maamusho shaqaalaha, dhiirigali dhaqan ay shaqaaluhu kuhelaan xoriyad ay fikirkooda kucabiraan.

Balan qaadka aan u samaynay saamileeydeena ayaa leh muhiimada koobaad. Waan iskutiirsanahay dhammaanteen si aan u ilaalino sharafta shirkada aan udifaacno dhaxalkeena.

Waad kumahadsantahay dadaalkaaga joogtada ah ee aad galisay siday Post guul ugaari lahayd.

ROBERT V. VITALE
Madaxwaynaha ahna Madaxa Fulinta

Daacadnimadu waa mabda'eena koowaad.

Shaqaalaha

Maalgashadayaasha

Macaamiisha

Macaamiisha iyo Bulshada

TUSMADDA

2
Warqad ka socota Xaafiiska Madaxa Fulinta ee Guud iyo Madaxwaynaha

4
Hordhac

5
Raadsashada Tusmayn iyo Cabirida Fikirka

24
Khadka Cabashada Shaqaalaha iyo Dhaafitaanka

6-9

7
Kalduwanaanta iyo Iskudhafnaanta

Goob shaqo oo Xushmad leh

8
Goob shaqo oo Amaan iyo Caafimaad leh

9
Arimaha shaqsiga ah iyo Macluumaadka Gaarka ah

Baraha Bulshada

10-13

11
Ganacsiga Gudaha

12
Haynta Diiwaanada iyo Buugaag Quman

Ilaalinta Hantida Shirkada iyo Macluumaadka Sirta ah

13
Ilaalinta Hantida Sirta ah ee Shirkada

14-20

15
Iskudhaca Maslaxada

18
Tartan Cadaalad ah

Kahortaga Laaluushka/Musumaasuqa

19
Isdhaafsiga Ganacsiga Caalamiga ah

20
Ilaalinta Xaquuqda Aadamaha

21-23

22
Tayada Alaabta

Suuq gayn Masuuliyad keh

Hawlaha Siyaasada

23
Ilaalinta Bii'ada

Kaqaybgalinta Bulshada

Xiriirka Banaanka (Baahinta Xogta)

GuidePost
Working Together With Integrity

Post Holdings, Inc. iyo shirkada hoos timaada iyo kuwa xiriirka la leh aduunka oo dhan ("Post," "Shirkada" ama "anaga") waxaa naga go'an inaan ganacsigeena u fulino si anshax iyo masuuliyad ah anagoo u hogaansamayna dhammaan sharciyada iyo qanuunada la quseeya. Kalsoonideena dhanka hufnaanta waxaa lagu dhisay go'aanada aan samayno iyo sida aan ushaqayno.

Xubin kasta oo kamid ah Bulshada Post waxaa xaq iyo waajib ku ah inuu raaco Xeerka Anshaxa (Xeerka") iyo inuu u hogaansamo Siyaasadaha Guud ee Shirkada, iyo sidoo kale siyaasadaha iyo nidaamyada waaxaha ganacsiga iyo deegaanka. Marka laga hadlaayo ujeedada Xeerkeena, eray bixinta "shaqaalaha" waxaa kamid ah shaqaalaha, hawlwadeenada, saraakiisha iyo agaasimayaasha Shirkada.

Waxaa jiri kara xaalado ay xeerarka ama sharciyadu meelaha qaar ama ganacsiyo gaar ah ay ka adagyihiin mabaadii'da kuqoran Xeerka. Marka tilmaanta aysan caddeyn waxa loola jeedo, la tasho mid kamid ilaha ku hoos qoran **Raadinta Tilmaamaha iyo Hadalka.**

WAAJIBAADKA MAAMULKA

Hogaamiyaasha dadka waxaa saaran masuuliyad wayn oo ku aadan hogaamintooda iyo inay tusaale u noqdaan sida qaab habboon oo joogto ah loogu hogaansami lahaa Xeerkeena. Haddii aad tahay maamule ama kormeere, waxaa lagaa filayaa:

- In shaqaale kasta oo uu waajib kaa saaran yahay inaad la socodsiiso uuna fahmo Xeerka iyo siyaasadaha la xariira iyo sidoo kale hanaanada iyo qaabka loo codsado
- In erayo iyo ficil ahaanba aad ku muujiso dadaalkaaga ku aadan Xeerka, hanaanada iyo siyaasadaha la xariira
- Inaad joogteyso siyaasad "Daah furan" oo dhiirigelinaysa shaqalaha inay raadsadaan talo ama caawimaad ayagoon wax cabsi ah ka qabin in la ganaaxo ama laga aargoosto
- Inaad si degdeg ah usoo gudbiso waxna oga qabato xadgudubyada, una hubiso in tallaabooyinka anshaxa ayna la jaanqaadayaan Waaxda Shaqaalaha iyo tallooyinka sharciga, sida habboon
- Inaad kor u qaado shaqanka cabashada ayadoo la jaanqaadaya xariirna la sameynaaya dhammaan shaqaalaha

BAARITAANADA

Warbixin kasta waxaan u qaadanaa si dhab ah, waxaana oga jawaabnaa si dhaqsi leh anagoo ku sameynayna baaritaan buuxa haddii ay muhiim tahay. Dhammaanteen waxaa nalaga sugayaa inaan si buuxda ula shaqeyno baaritaan kasta haddii nalaga codsado waana inaanan si kas ah usoo bandhigin xog been abuur ah, been u sheegin baarayaasha ama aanan u diidin inaan u hogaansano baaritaanka, maadaama ku dhaqaaqida wax kamid ah tallaabooyinkaan ay keeni karaan in tallaabo sharci nalaga qaado.

WAX AARGOOSI AH MAJIRO

Goobteenu waa inay noqotaa mid dhamaan shaqaaluhu dareemaan kalsooni markay soosheegayaan anshax xumo kasta oo layaqaan ama laga shakiyo inay jirto ama xadgudub ayagoon kacabsan in laga aargoosto. Fal kasta oo aargoosi ah kana dhan ah shaqsi kaasoo, si niyad sami leh, usoo sheegay xadgubub dhab ah ama laga shakiyay ama kaqayb qaata baaritaan socda si wayn ayaa looxarimay.

“Daah furnaan” waxaa loola jeedaa in hogaamiyaasha dadka iyo maamulka, oo ay kujiraan ilaha la heli karo ee kujira boogaan, waxay dhiirigelinayaan hadalka daah furan, fikradaha iyo wada hadalka ku saabsan su'aalaha iyo tabashooyinka shaqaale kasta uu qabo . Waxaan dooneynaa inaan hubino in si wanaagsan wax looga qabto tabashooyinkaaga iyo su'aalahaaga ayadoo la adeegsanaayo ilaha ugu habboon. Si aad u hesho xog dheeraad ah, eeg **Warbixinta Anshax xumada iyo Siyaasada Xalinta Dhacdada**.

Raadsashada Tusmayn iyo Cabirida Fikirka

Shirkadeenu waxay shaqada ugu fiican qabataa marka wadahadalka iyo xariirka furan oo amaanada kudhisan laxushmeeyo lana dhiirigaliyo. Haddii aad la kulanto xaalad adag ama aad qabto tabasho, waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad tixgeliso habka saxda ah tallaabada adoo la hadlaaya mid kamid ah ilaha halkaan ku qoran. Hadaad ogaato in lagu xadgudbay Xeerka, sharuuxda shirkada ama qaanuunka, waxaa lagaa doonayaa inaad usheegto mid kamid ah qolyaha soosocda:

1. Maamulkaaga
2. Ilaha Dadwaynaha
3. Sharciga
4. Sharciga Hogaansanaanta iyo Anshaxa ee Caalamiga ah
5. Laynka Cabashada Shaqaalaha

si aad u hesho taleefanka **(877) 225-7389** haddii aad joogto Maraykanka iyo Kanada ama si aad u isticmaalka lambarka taleefanka ee dalka aad joogto (ka fiiri qaybta gadaale ee xaashida Xeerkeena)

webka laga heli waa **www.postholdings.ethicspoint.com**

Kalduwanaanta iyo Iskudhafnaanta
Goob shaqo oo Xushmad leh
Goob shaqo oo Amaan iyo Caafimaad leh
Arimaha shaqsiga ah iyo Macluumaadka Gaarka ah
Baraha Bulshada

Shaqaalaha

INAAN UWADA SHAQAYNO SI XUSHMAD AY KUJIRTO

Guusha waxaa kaliya lagu gaari karaa hadaan qof walba siino xushmad. Qofkasta oo naga mid ah wuxuu xaq uleeyahay inuu kushaqeeyo goob kacaagan dhibaatayn, takoor, rabshad iyo arrgoosi.

KALADUWANAANTA IYO ISKUDHAFNAANTA

Waxaan dooneynaa inaan qadarino kala duwanaanshaha noo dhaxeeya dhammaanteen waxaana dooneynaa inaan helno shaqaale wakiil ka ah bulshada aan ku dhex noolnahay aana ka dhex shaqeyno. U dabaaldegida kaladuwanaanshaha shaqaalaheena waxay naga dhigaysaa urur wanaagsan, waxayna na siineysaa aragti balaaran oo nagu hageysa bii'o xirfadeed oo tayo sare leh oo gacan ka geysta kor u qaadida hormarka ganacsiga. Marka laga imaado u dabaaldegida kaladuwanaanshaha, waxaan ku dadaalnaa in shaqaalaheenu noqdaan dadyoow kaladuwan, iyo inaan ogaano aana meesha ka saarno caqabadaha kahortagaaya fursadaha buuxa iyo ka qaybgalka dhammaan heerarka ururka. Shaqsi kasta waxaa lagu qiimeeyaa taariikhdiisa nolaleed ee gaarka ah, aragtidiisa, waayo aragnimadiisa iyo qiyamkiisa. Hadafkeenu waa in shaqaale kasta dareemo inaan meesha laga xigin iyo inaan sii balaarino hormarka aan ka sameyneyno waayo aragnimadeena iyo guusha wadajirka ah.

GOOB SHAQO OO XUSHMAD LEH

Xadgudubka Qof walba wuxuu xaq u leeyahay inuu ka shaqeeyo bii'o aan lahayn xadgudub. Dhibaatayntu waa fal aan wanaagsanayn oo qasaysa dadaalka shaqo ee shaqsiga ama abuuraysa goob shaqo oo colaad kajirto.

S+J

Su'aal: Qofka aan la shaqeeyo ayaa ii sheegay in kormeeraheeda uu ka helay uuna ku cadaadinaayo inay shukaansi u raacdo. Waxay ka walaacsan tahay inay ka hadasho tabashada ay qabto. Ma inaan ka hadlaa?

Jawaab: Haa, haddii qofka kula shaqeeyo uu ka walaacsan yahay inuu hadlo, si qarsoodi ah xaalada jirta ugu sheeg maamulaha ama Waaxda Shaqaalaha. Dhammaanteen waxaa naga go'an inaan joogteyno bii'o shaqo oo ka caagan xadgudub.

Dhibaataynta waxaa kujira falalka aan loo bogin ee hadal, fiirinta, gacan qaadka ama nooc kale oo ficin ah (fal galmo ama aan galo ahayn) kuwaasoo tartarsiinaaya, aflagaadaynaaya ama abuuraaya goob shaqo oo colaad kajirto. Dhibaataynta si adag ayaa looxarimay. Kuxadgudubka xeerka mamnuucida ayaa keenaysa talaabo anshax oo gaarsiisan, ayna kujiraan, shaqada oo lagaa cayrsho. Sidoo kale eeg **Siyaasada ka dhanka ah Xadgudubka, Takoorka, Aargoosashada** si aad u hesho tilmaamo dheeraaad ah.

Takoorka Ma takoorno mana handaadno shaqaalaha sidoo kalena cadaalad la'aan kuma sameyno codsadayaasha. Go'aanada shaqaalaysiinta waxaa lagu dhisaa xirfad, aqoon iyo dadaalka dhanka shaqada ayadoon lafiirinayn astaamaha qofka sida isirkiisa, midabkiisa, diintiisa, jinsigiisa, wadankuu kasoo jeedo, qoomiyadiisa, muwaadinimadiisa, da'diisa, naafonimadiisa, dookhiisa galmada, aqoonsigiisa jinsiga, aqoonsigiisa ciidanka ama halyeeynimada iyo xaaladiisa guurka. Waxaan kudadaalaynaa xaqiijinta in shaqsiyaadka shaqada kuguulaysta ay kor uqaadaan fursada ay kuhirmarinayaan awoodahooda iyo hormarkooda.

GOOB SHAQO OO AMAAN IYO CAAFIMAAD LEH

Xaaladaha Shaqalaha ee Badqabka leh

Waxaa naga go'an in dhammaan shaqaalaheenu helaan goob shaqo oo ammaan ah. Marna uma ogolaanayno hawlaha amaanka halista ku ah goobta shaqada, kaqaybgale ama kormeere ahaan. Si aan uxaqiijino amaanka qofkasta oo xarumaheena jooga, shaqaalaha waxaa laga doonayaa inay fahmaan ayna kudhaqmaan dhamaan tilmaamaha iyo nidaamyada badbaadada. Haddii aad ogaato inay xaalad shaqo oo aan ammaan ahayn ama xaalad kasta oo ku xadgudbeysa siyaasada Shirkada, sharciga, ama haddii kale keeneysa khatar, waa inaad si dhaqso ah ulaa gudbiso maamulka goobta ama mid kamid ah laamaha ilaha ee ku qoran qaybta ciwaankeedu yahay, **Raadsashada Talo iyo soo bandhigista Tabashada**.

Goob Shaqo oo aan lahayn Muqaadaraad Ku shaqeynta goob shaqo oo lagu cabo daroogada ama aalkahoolka waxay halis ammaan oo aan la aqbali karin ku keenaysaa adiga iyo dadka kale. Kashaqaale ahaan, waxaa naga xaaraan ah haysashada, isticmaalka, ama inaan shaqayno anagoo isticmaalaynta khamri, daroogooyinka xaaraanta ah, ama waxyaabaha maanka dooriya intaan shaqada kujirno. Shaqaalaha waxaa laga doonayaa inay fuliyaan waajibaadkooda ayagoo kacaagan isticmaalka maandooriye kasta oo dhaawac ugaysan kara dadaalka shaqada ama keenaaya halis soowajahda shaqada. Fadlan kafiiri wixii tilmaamo dheeri ah xeerka deegaankaaga.

Amniga Shaqsiga Shaqaalaha waxaa laga mamnuucay inay gacanta la galaan fal kasta oo ku sababaaya in shaqsi kale dareemo handadaad ama amni la'aan. Falalkaan waxaa kujiri kara hanjabaadaha ama muujinta nooc kasta oo cadaawad ah, cabsi galin ah ama habdhaqan gardaro ah. Waxaan xaaraantimaynay in hub lagu haysto goobta shaqada. Xarimaadaan waxay camimaysaa goobaha Baakinka ee Shirkada meelkasta oo sharcigu ogolyahay. Shaqaaluhu waa inay silamarkaba soosheegaan hanjabaadaha ama walaacyada kasoo food saara rabshad suurgal ah una soosheegaan maamulka deegaanka, ama markay jiraan xaalado degdeg ah, saraakiisha dawlada ee deegaanka.

Waxaan u hogaansanaa **sharciyada deegaanka** wax kasta oo aan ku sameyno arrimaha la xariira ganacsiyada aduunka. Waxaan waafaqnaa heerarka kudarsan mushaar bixinta iyo saacadaha, sharciyada xarimaaya takoorka iyo dhibaataynta, tilmaamaha amaanka iyo shuruudaha fursadaha shaqaalaysiinta ee loosimanyahay. Haddii aad qabto wax tabasho ah oo ku saabsan takoor, xadgudub ama dhaqan kale oo aan sharci ahayn, igala soo xariir ilaha lagu xusay qaybta Raadsashada Talo iyo soo bandhigida Tabashada.

ARIMAHA SHAQSIGA AH IYO MACLUUMAADKA GAARKA AH

Intaan wadno hawlaheena ganacsi, Shirkada ayaa aruurinaysa macluumaadka gaarka ah ee adeeg bixiyaasha, macaamiisha, dadka wax iibsada, shaqaalaha iyo qolyaha kale ee sadexaad. Macluumaadkaan oo ama kaligiis ah, ama lagu dhafay macluumaadyada kale ee lasoo aruursho, wuxuu si gaar ah u aqoonsanayaa shaqsiyaadka sida magaca qofka iyo ciwaankiisa oo wadajira ama nambarka aqoonsigiisa qaranka. Waxaan utaaganahay inaan kuhayno dhamaan macluumaadka shaqsiga ah si masuuliyad kujirto oo waafaqsan dhamaan sharciyada iyo xeerarka laxariira macluumaadka shaqsiga ah ee dadka. Waxaan xadidnaa helitaanka macluumaadka shaqsiga ah ee qofka waxaana kadhawrnaa lumista, si khaldan u isticmaalida, in si sharci daro ah lagu qaato ama lagu faafiyo, in wax laga badalo ama labaabi'iyo.

Ayadoo Shirkadu xushmeenayso sirta xogta shaqaalaha, waxay xaq u leedahay inay la socoto xaalada hantideena iyo goobteeda, sida kumbuyuutarada, diiwaanada taleefanada, qaanadaha wax lagu kaydsado, iimaylada, faylasha, dukumiintiyada ganacsiga iyo goobaha shaqada sida uu sharcigu u ogolaanaayo. Shaqaaluhu waa inaysan filan arimo sir ah markay adeegsanayaan adeegyada ama qalabka shirkadu siisay, ilaa in sharcigu sidaas siinaayo maahee. Sidoo kale waxaan meelaha uu sharcigu dhigaayo, shaqsiyaadka siinaa ogeysiis ku saabsan sida aan u isticmaalno xog kasta oo aan aruurino. Eeg **Bayaanka Sirta Xogta Shaqaalaha** iyo **Adeegsashada Siyaasada La aqbali karo ee IT** si aad u hesho tilmaamo dheeraad ah.

BARAHA BULSHADA

Baraha bulshada ayaa saamayn wayn kuleh wadaagida fikradaha, xayiisiinta alaabaha iyo isdhaafsiga macluumaadka. Shirkada ayaa u adeegsata baraha bulshada si ay ugu xayiisiiso alaabaheena ugalana xariirto shaqaalahaeeda, macaamiisha, dadka wax ka iibsada, qolyaha sadexaad iyo dadwaynahaba. Waxaan kudhaqanaa dhamaan sharciyada iyo xeerarka laxariira isgaarsiinta casriga ah. Shaqaalaha adeegsada baraha bulshada ee kabaxsan shirkada waa inay marna kahadlin macluumaad kasta oo Sir ah oo shirkadu leedahay waana inay kafogaadaan fikradaha wax yeelayn kara Shirkada; kaliya shaqsiyaadka afhayeenada ah ee fasaxa haysta ayaa u adeegsan kara baraha bulshada inay bayaano kufaafshaan ayagoo shirkadeena wakiil ka ah. Eeg sidoo kale **Siyaasada Warbaahinta Bulshada**.

S+J

Su'aal: Waxaan aqriyay qoraal ku saabsan in macmiil uusan ku qancin alaabaheena waxaana aaminsanahay inay tahay arrin aan cadaalad iyo sax ahayn. Maka jawaabi karaa?

Jawaab: Maya. Kaliya waxaa ka jawaabi kara dadka oggolaanshaha u Haysta inay U hadlaan Shirkada. Taas badelkeeda, u sheeg waaxda Isgaarsiinta Shirkada, Arrimaha Macmiilka ama Waaxda Suuqgeynta.

Ganacsiga Gudaha

Haynta Diiwaanada iyo Buugaag Quman

Ilaalinta Hantida Shirkada iyo Macluumaadka Sirta ah

Ilaalinta Hantida Sirta ah ee Shirkada

Maalgasha-dayaasha

KA WADA SHAQEYNTA MASUULIYADA MAALGELIYAASHEENA

Maalgashadayaasheena ayaa nagu aaminay lahaanshaha dadaal iyo qadarin. Waxaan ku ilaalinaa kalsoonidooda anagoo markasta kufulina ganacsigeena heerka ugu sareeya oo hufnaan leh. Waxaan ku dhaqanaa dhamaan sharciyada naquseeya ee dhanka amaanka iyo xeerarka Suuqa Isdhaafsiga Ganacsiga ee New York.

GANACSIGA GUDAHA

Shaqaaluhu kuma gancsan karaan ama madhiirigalin karaan iibka ama Gadashada alaabta Shirkada ayagoo raacaaya macluumaadka gudaha. "Ganacsiga gudaha" waa in qofku gato ama iibsho alaab si shaacbaxsan intuu alaabta gacanta kuhayo, macluumaadka aan dadka kadhaxaysa ee soosaaraha amaanka. Ganacsiga Gudaha "bixinta xogta" (u gudbinta xogta gudaha qof kasta oo u adeegsan kara inuu iibsado ama u gato arrimo amni) waa mamnuuc sida ku xusan siyaasada Shirkada iyo sharciyada dalal badan. Markuu tuhun jiro, macluumaadka shaqaalaha lagasoo aruursho waa in loo arkaa mid muhiim ah oon lashaacin karin. Hadaad su'aalo kaqabto iibinta ama gadida wax amaan ah xaaladah qaarkood kaasoo laxariiri kara macluumaad sir ah, xiliga iibka ama gadida amaanka, ama wax kale oo sharciga kucad, kala tasho laamaha Sharciga. Eeg sidoo kale **Siyaasada Ganacsiga Gudaha**.

Waxyaabaha macluumaadka aan lashaacin karin waxaa kamid ah mushaaraadka, faaiidooyinka iyo khasaarooyinka waawayn ee ganacsiga, joojinta iibabka, iibinta ama maalgashiyada, macluumaadka waxsoosaarka cusub, dacwad wayn ama isbadalo kudhaca maamulka.

S+J

Su'aal: Wuxuu iisheegay mid kamid ah dadka ila shaqeeya in Shirkadu asbuuca soosocda kudhawaaqi doonto faaii'dooyinka ay hesho wuxuuna iisheegay in faaiidooyinku kabadan yihiin wixii khubarada daraasadu filayeen. Waan ogahay in arintaani noqon doonto saamayn wanaagsan oo kutimaada qiimaha ganacsigeena. Maku kudhaqaaqi karaa arintaas oo ma iibsan karaa kaydka Shirkada si hormaris ah kahor intaan bulshada loo shaacin?

Jawaab: Maya, ma iibsan kartid kaydka Shirkada waayo waxaad gacanta kuhaysaa alaabta shirkada, oo ah macluumaad aan dadka looshaacin wali. Natiijooyinka faaiidooyinka lahelo waxaa loo tixgaliyaa inay yihiin alaab maadaama ay saamayn kuyeelanayaan kaydka Shirkada iyo, ilaa bulshada looga faafiyo, waxaa arintaan loo tixgalinayaa macluumaad gudaha shirkada ah (aan-bulshada kadhaxayn).

HAYNTA DIIWAANADA IYO BUUGAAG QUMAN

Waxaan utaaganahay ilaalinta buugteena iyo diiwaanadeena maaliyada oo leh heerka ugu sareeya ee saxnaanta, dhamystrinaanta iyo hufnaanta. Waxaan ilaalinaa nidaamka xisaabinta iyo koontoolka gudaha ee loogu talagalay in lagu ilaaliyo khasaaraha iyo in lagu hubiyo in diiwaanada Shirkada yihii kuwo la isku haleyn karo si loo diyaariyo bayaanka dhaqaalaha. Laguma qori karo khiyaano ama wakaalado tuugo ah buugaagta, diiwaanada ama akoonada Shirkada. Waxaan fahansanahay in maalgeliyaashu ay ku tiirsan yihiin diiwaanada iyo buugaagta si ay u helaan xaalada Shirkada oo la isku halayn karo oo saxan.

Kashaqaale ahaan, waxaan masuul kanahay xaqiijinta in macluumaadka kuqoran diiwanadeenu uu uahau mid dhamaystiran, saxan oo lafahmi karo. Haddii aad ogaato kharashaad aan sax ahayn ama hanaan xisaab oo khaldan, waa inaad xaalada si degdeg ah ugu soo gudbisaa mid kamid ah ilaha lagu qoray **Raadsashada Talada iyo Ka hadlida Tabashada**.

Mid kasta oo naga mid ah wuxuu soo daabacaa diiwaanada maadaama ay qayb ka yihiin shaqooyinkeena joogtada ah, sida warbixinta kharashaadka, heshiisyada, soojeedinada iyo iimeelada. Waa muhiim in diiwanadaan ay yihiin kuwo sax ah oo qaab iskudheeli tiran looqoray. Fasir kasta oo qaldan wuxuu dhaawaci karaa Sharafta amaanada Shirkada wuxuuna keeni karaa in maalgashadayaasheenu lumiyaan kalsoonida ay nagu qabaan. Gaar ahaan, waxaan mamnuucnay codsiga ama oggolaanshaha kharash celinta kharashaadka la qarinaayo ama been abuurka ah ama lahaanshaha macmiilka qarsoodiga ah, oo aan la diiwaangelin ama kharashaadka aan lasoo gudbin. Diiwaanada ganacsiga waa in la ilaaliyo, la kaydiyo lana baabi'iyo sida ku xusan **Diiwaanadeena iyo Siyaasada Maamulka Macluumaadka**. Hadaad ogtahay jiritaan wax diiwaano ganacsi ah ood hayso kuwaasoo laxariira dacwad maxkamadeed ama baaritaan, mabadali kartid,qarin kartid ama burburin karid wax dukumiintiyo ah oo laxariira kiiskaas ilaa in sidaas laguu sheego mooyee. Arintaan waxaa looyaqaanaa Diwaan Kujira Amar Sharci. Hadaad su'aalo kaqabto in diiwaani kujiro marka Haynta Sharciga ah, fadlan laxariir Waaxda Sharciga.

ILAALINTA HANTIDA SHIRKADA IYO MACLUUMAADKA SIRTA AH

Waxaan dhamaanteen wadaagi doonaa masuuliyada ah inaan si wacan u ilaalino oo aanu si masuuliyad leh u adeegsano hantida Shirkada si aan uga fogaano khasaare, dhawaac, xatooyo, iyo luminta hantida shirkada. Hantida lataaban karo waxaa kujira hantida maguurtada ah sida xarumaha, alaabta, qalabka, kaydka, gawaadhida iyo maaliyada Shirkada. Hantida aan maguurtada ahayn, sida macluumaadka sirta ah iyo quman ee shirkada, hantida nidaamka shaqo iyo nidaamyada macluumaadka kaydsha waa in sidoo kale la ilaalshaa. Shaqaale kaste waxaa laga doonayaa inuu noqdo ilaaliye wanaagsan oo hantideena difaaca asagoo u adeegsanaaya si quman kana difaacaaya isticmaal khaldan. Maaliyada shirkada waa in loo maareeyaa si waafaqsan dhammaan xeerarka quseeya ee Shirkada.

Adeegyada tignooloojiyada, sida laabtoobyada, taleefanada gacanta, taableetyada iyo softwareka waxaa laguu siiyaa sababo shaqo awgood. Waa inaan muujinaa taxadar iyo masuuliyad markaan adeegyadaan isticmaalayno anagoo raacayno xakamaynada amaanka iyo cabirada ay

WAXAAN DHAMMAANTEEN WADAAGNAA MASUULIYADA AH INAAN SI WACAN U ILAALINO AANA SI MASUULIYAD LEH U ADEEGSANO HANTIDA SHIRKADA.

Shirkadu dajisay si loo ilaalsho macluumaadka iyo kaydka shirkada loogana ilaalsho in si kama' ah ama sharci daro ah loo faafiyo, si khaldan loo isticmaalo, si khaldan wax looga badalo ama loo baabi'iyo.

Adeegsiga adeegyada tignooloojiyada ee Shirkada si wayn ayaa looga xarimay hawlaha sharci darada ah, aan anshaxa fiican lahayn ama hadii kale kahor imaanaaya Xeerka ama Siyaasada Shirkada. Isticmaalka shaqsiga ah ee adeegyada tignooloojiyada waa la aqbali karaa haddii ay xadidadan yihiin ayna yihiin kuwo kuhaboon shaqada. Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo la xariira isticmaalka adeegyada tignooloojiyada ee Shirkada, fadlan akhri **Xeerka Isticmaalka IT ga ee la Aqbali karo**.

Marka lagu shaqaalaysiinaayo waxaad heli kartaa macluumaadka qaar oo Shirkada kusaabsan macaamiisha, adeeg bixiyaasha ama iskaashatada ganacsiga shirkada ama qolyo kale oo sadexaad macluumaadkaas oo ah mid sir ah ama la ilaalsho. Macluumaadka sirta ah waxaa kamid ah dhamaan macluumaadka aan lashaacin karin ee ay isticmaali karaan dadka shirkada tartanka kulajira, ama halista ku ah Shirkada ama macaamiisheeda, hadii la faafiyo. Waa in markasta niyada lagu hayaa in macluumaadka shirkadu yahay mid sir ah ilaa inaad fahan cad kahaysato in macluumaadkaani yahay mid dadwaynaha lagu dhex faafin karo maahee. Waa inaad mar walba qaado talaabooyinka muhiimka ah si aad u ilaaliso xog kasta oo qarsoodi ah oo aad adeegsan karto. Kaliya xogta qorsoodiga ah la wadaag shaqaalaha u qaba baahida ganacsi. Kafogoow kahadlida maclumaadka sirta ah markaad joogto goobaha ay suuragal tahay in cidkale maqasho sida maqaayadaha, diyaaradaha, wiishashka jaranjarada ama goobaha dadka kadhexeeya ee gudaha xarumaheena. Si aad u hesho macluumaad dheeri ah, fadlan akhri qaybta **Xeerka Faafinta Dadwayne ee Macluumaadka Shirkada**.

ILAALINTA HANTIDA SIRTA AH EE SHIRKADA

Waa inaan ilaalinaa hantida sirta ah ee Shirkada. Marna ha u ogolaan in qolo sadexaad isticmaasho hantideena sirta ah ayadoon fasaxa quman uhaysan. Hantida sirta ah waxaa kamid ah astaamaha ganacsiga, alaabaha, naqshadaha baakadaha, astaanta shirkada, xaquuqda daabacaada, waxyaabaha aan indisno, calaamadaha iyo siraha dhanka ganacsiga. Hantida sirta ah waxaa sidoo kale kamid ah waxsoosaarka shaqo ee shaqaalaha sida hal abuurada, fikradaha, waxyaabaha cusub ee la saaro, kobacyada, ujeedooyinka, naqshadaha ama waxyaabaha kale ood ku abuurto qalabka Shirkada, waqtiga Shirkada, qarashka Shirkada ama qayb kamid ah shaqadaada aad Shirkada uhaysay intaad u shaqeyneyso Shirkada. Waxaan ilaalinaa xaquuqda hantida sirta ah ee shirkadaha kale si lamid sida aan kuweena u ilaashano.

Iskudhaca Maslaxada
Tartan Cadaalad ah
Kahortaga Laaluushka/Musumaasuqa
Isdhaafsiga Ganacsiga Caalamiga ah
Ilaalinta Xaquuqda Aadamaha

Macaamiisha

KA WADA SHAQEYNTA MASUULIYADA MACAAMIISHEENA

Inaad iaaliso dadaalka aad galinayso sharafteena waxay dhisaysaa kalsooni ay nagu qabaan macaamiisheenu waxayna xoojinaysaa awooda kalsoonida nalakuqabo. Hawl kasta oo looqabto macaamiisheena waa inay noqotaa mid cadaalad ah oo run kudhsan, marna maxumaan karto.

ISKUDHACA MASLAXADA

Qofkasta oo naga mid ah waa inuu kataxadaraa inuu noqdo qof kacaagan saamayn kasta, masaalix ama xariir kahor imaanaaya masaalixda Shiradeena. Tani waxay kadhigantahay hawlaheena shaqsi, dhaqaale, ganacsi ama hawle kale waa inaysan saamayn kuyeelan awoodeena ku aadan sidaan u abuuri lahayn go'aano wanaagsan, oo yool kudhisan anagoo kawakiil ah Shirkada. Si aan u ilaalino sharafteena, ka fagoow xaaladaha keeni kara soo shaac bixida iskudhac maslaxadeed.

Qaybaha soosocda waxay kahadlayaan qaar kamid ah xaaladaha guud ee keeni kara iskudhacyada.

Shaqo Banaanka ah In qofku kashaqeeyo meel kabaxsan Shirkada waa inaysan saamayn xun kuyeelan dadaalkaaga shaqo ama abuurin iskudhac maslaxadeed. Xeerka shiradu kuuma fasaxaayo inaad ushaqayso ama adeegyo siiso shirkad kasta oo kale taasoo tartan kula jirta shirkada, macaamiil ama adeeg bixiye adoon fasax kahaysan Waaxda Adeegyada Shaqaalaha.

Marka laga reebo shaqada banaanka shirkada, hawlaha ganacsi ee xorta ah sida inaad furato ganacsi shaqsi ah oo saacado kooban kuu shaqeeya, ayaa keeni kara iskudhac maslaxadeed hadii hawlaha ganacsi ay Tartan kula jiraan masaalixda Shirkada ama keenayaan saamayn xun oo gaarta Shirkada. Sababo jiro awgood, haddii aad maslax buuxda ama qayb ah kuleedahay ganacsi kale, ganacsigaas asaga ah adeegyo masiin karo Shirkada ama shirad kale oo hadda ama mustaqbalka tartan lagali karta shirkadeena, macaamiil ama adeeg bixiye ayadoon faafin iyo fasax hore loohaysan.

S+J

Su'aal: Waxaan doonayaa inaan shaqo saacado kooban ah karaadsado dukaanka adeegga oo deegaankayga kuyaala. Dukaanku wuxuu gadaa qaar kamid ah alaabaha Shirkadeenu soo saarto. Arintaani mawaxay shirkada ukeenaysaa isdhac maslaxadeed?

Jawaab: Ilaa inta aysan shaqada saacadaha koobani kaahor istaagayn waqtigaaga iyo dadaalkaaga aad galinayso shaqada aad Shirkada iyo illaa inta aadan kulug lahayn soo iibinta alaabta uu dukaanku gado, wax dhibaato ah malaha.

Masaalixda Dhaqaale Waxaan ixtiraamaynaa xaqa aad uleedahay inaad maalgashato shirkado kale ilaa iyo inta aysan masaalixdaada dhaqaale saamayn kuyeelanayn dadaalkaaga ama hawlahaaga aad qabanayso adoo matalaaya

QOFKASTA OO NAGA MID AH WAA INUU KATAXADARAA INUU NOQDO QOF KACAAGAN SAAMAYN KASTA, MASAALIX AMA XARIIR KAHOR IMAANAAYA MASAALIXDA SHIRKADA.

Shirkada iyo/ama aadan afduubayn sharafta Shirkada. Majiro shaqaale ama qofkasta oo kamid ah xumaha qoyskiisa (sida hoos kuqeexan) oo maalgalin muuqata kuyeelan kara ganacsi kasta oo doonaaya inuu ganacsi layeesho Shirkada, ama shirkad kale oo tartan kula jirta, ilaa in lashaaciyo go'aana laga gaaro in aysan jirin wax iskudhaca oo imaan kara. Hase yeeshee, lahaansho kayar 5% hanti maalgashi oo shaqaynaysa (ama wax kabadan 5% oo lagu galay maaliyad wayn ama ganacsiyada lamid ah ee aan qumanayn, maaraynada aan tooska ahayn) oo aad udarsato shirkad bulshada laga yaqaano waa laguu ogolyahay.

Lashaqaynta Xubnaha Qoyska
Waxaan kafogaanaa iskudhacyada maslaxadeed ee udhaxeeya xariiradeena shaqsi iyo kuwa shaqada. Ayadoo ah tilmaan guud, kuuma ogolaanayno inaad si toos ah ukormerto xubin qoyskaaga kamid ah oo shaqo kujira. Xiliyada uu xubin kamid ah kashaqeeyo isla waaxda ama goobta aad kashaqayso, waajibaadka shaqada iyo shaqooyinka dheeriga ah waxaa lagu salaynayaa shuruud yoolal kudhisan go'aanada dhanka mushaarka iyo qiimeynada dadaalka shaqadana waxaa qabanaaya shaqsi kamadax banaan qoyskaaga. Iskudhac jira ama ay suuragal tahay inuu dhaco ayaa kajiri kara xaaladaha marka ay xubin qoyskaaga ah kashaqeeyo ama fuliyo adeegyo uu uqabto shirkad, macmiil, ama adeeg bixiye tartan kula jira Shirkada. Markasta waa inaad soosheegtaa xaaladaha tuhunka keeni kara una sheeg Laanta Dadwaynaha sida ugu dhakhsaha badan oo aad ku ogaato xaalad kasta oo imaan karta si aad uga fogaato xataa imaanshaha iskudhac maslaxadeed oo kayimaada xubin qoyskaaga kamid ah.

Xiriirka Goobaha Ganacsiga Xiriirka shaqsiyadeed ee jaceylka, galmada iyo/ama warbixinta dabeecada dhaw xiriirka tooska ah waa mamnuuc. Ogsoonoow in xiriirka shaqsiyadeed ee ka baxsan warbixinta shabakada tooska ah inay sidoo kale keeni karta dhibaato. Eeg **Siyaasada Xiriirka Goobta Shaqada** si aad u hesho talo.

Furadaha Isbahaysiga Ganacsi Waa inaanaan marna latartamin Shirkada ama adeegsan macluumaadka Shirkada, hantideeda iyo/ama mansabka aan kahayno shirkada aanaana u adeegsan dano gaar ah. Waxaa nalaga doonayaa inaan kor uqaadno masaalixda Shirkada waana inaanaan marna kafaaiidaysan fursad la abuuray intaan kashaqaynaynay Shirkada. Si taas lamid

Xubinta Qoyska oo ay kujiraan xaaska, ilmaha, walaalkaa, waalidka, ilmaha xaaskaaga/ninkaagu dhalay, xaaskaa aabahaa, iyo sidoo kale hooyadaa, aabahaa, wiilkaaga, gabartaada, walaalkaa, ama dumaashidaa iyo qof kasta oo kale oo kula nool.

ah, waa inaanaan marna kucaawin ama u ogolaan qofkale inuu kafaaiidaysto qaadashada fursad ganacsi ama maalgashi sababo laxariira masaalixdiisa khaaska ah, ayna kujiraan xubnaha qoyskeena iyo saaxibadeen.

Xubin kanoqoshada Golayaasha iyo Gudiyada
Iskastoo aan dhiirgalinayno kaqayb noqoshada ururada xirfadlayda iyo hawlaha bulshada, hadda waa muhiim in kaqaybgalkeenu uusan dhibaato kunoqon sharafta Shirkada ama uusan naga mashquulin fulinta shaqooyinkeena. Shaqaalaha lagama doonayo inay fasax uqaataan kashaqaynta gudiyada ururada khayriga ah ilaa iyo inta hawlaha ururadaasi aysan wax dhibaato ah usoo jiidayn ama kahor imaanayn waajibaadka shaqaale ahaan aan uhayno Shirkada. Fasax hore ayaa lagaa doonayaa markaad kashaqayn rabto gudigga agaasimayaasha urur kale oo kasta adoo raacaya Hanaanka iyo Anshaxa Guud.

Hadiyadaha iyo Bashaalka Isdhaafsiga hadiyadaha iyo siinta waxyaabo bashaal ah waxay ubaahan yihiin tixgalin xasaasi ah. Inkastoo hawlaha qaadashada iyo bixinta hadaiyaduhu ay xoojiyaan wada shaqaynta ganacsiga, haddana waxay abuuri karaan iskudhac maslaxadeed, ama inay kadhalato iskudhac maslaxadeed. Sababtaan awgeed, anaga ayaa masuul ka ah xaqiijinta hadiyad ama shay raaxo oon bixinay ama nala siiyay uu ahaado mid uu ogolyahay Xeerkeena iyo dhamaan siyaasaadka iyo sharciyada arintaan quseeya. Waxaan si adag umamnuucnay bixinta, siinta ama qaadashada wax hadiyad ama deeq ah, haday tahay mid toos ah ama mid dadban, taasoo ay suuragal tahay inay saamayso wax go'aan ganacsi ah ama ay caburiso madax banaanida go'aanka qofka.

Hadiyado kasta oo aan bixino ama qaadano sababo laxariira xariir ganacsi waa inay noqdaan kuwo aan qiimo badan lahayn, aan joogto ahayn ayna buuxshaan dhamaan shuruudaha kale ee xeerarkeena, ayna kujiraan xeerka deegaanka iyo **Xeerkeena Kahortaga Laaluusha/Kahortaga Musuqmaasuqa**. Waa muhiim inaan xasuusnaano in wax loo arko kuwo macquul ah marka laga hadlaayo sharci ama dhaqan goob gaar ah loo arki karo kuwo sharci daro ah marka goob kale la joogo. Hadiyadaha la aqbali karo waa kuwa muuqda sida alaabta gaarka ah ee ay kuqoran tahay astaanta shirkadu, saladaha hadiyada iyo shayyada gaarka ah ee cuntada. Hadiyaha an la aqbali karin waxaa kamid ah:

- Hadiyaha kaashka ah ama lacagta udhigma
- Hadiyadaha lagu baxsho in lagu helo masaalix shaqsi ah ama faaiido ganacsi oon cadaalad ahayn

- Hadiyadaha sharci darada ah, galmada kusalaysan ama kadhanka ah mabaadii'deena
- Hadiyadaha lasiiyo saraakiisha dawlada

Siinta ama ugu yeerida cunto ama hadiyad yar ood siiso qof dawlada ushaqeeya waxay noqon kartaa sharci daro. Tilmaamo dheeri ah oo kusabsan lashaqaynta saraakiisha dawlada waxay kuqoranyihiin qaybta hoose Kahortaga Laaluushka/Musuqmaasuqa.

Soodhawaynta ganacsi, ayna kujiraan cuntooyinka iyo baashaalka, xaaraan maaha hadii dabiicada iyo xawaaraha kulanku uu yahay mid macquul ah uuna laxariiro kudhaqanka saxda ah ee ganacsiga Shirkada uuna waafaqsanyahay xeerarka iyo sharciyada quseeya.

Haddii aadan hubin in hadiyad ama wax siin laxariirta soodhawayn ay dhaaftay xadka macquulka ah, waa inaad laxariirtaa Anshaxa Caalamiga ah iyo U Hogaansanaanta wixii talo ah. Qaadashada hadiyad ama aqbalida soodhawayn taasoo laga yaabo inay xadka degsan kabadato waxay ubaahantahay fasax aad kaqaadato Madaxa Ilaalinta Xeerka.

S+J

Su'aal: Shirkad alaabta naga iibisa ayaa isiiyay kaar hadiyad oo looga adeegsan karo bakhaarada deegaanka maalmaha fasaxa ah. Ma aqbali karaa kaarka hadiyada?

Jawaab: Maya. Kaararka hadiyada, lacag kastaba oo kujirtaba, kama aqbali karto qof wax iibiya, sahayda keena ama qolyo saddexaad oo kale maadaama loo aqoonsan yahay inay lacagta kaashka ah u dhigmaan.

S+J

Su'aal: Shirkad alaabta naga iibisa ayaa isiisay hadiyad qaali ah intuu socday kulan ganacsi. Madoonayn inaan kuxumeeyo sidaas awgeed ayaan ku aqbalay hadiyadii. Maxay tahay inaan sameeyo?

Jawaab: Waa inaad hadiyada kuwargalisaa Waaxda Anshaxa Caalamiga ah iyo U Hogaansanaanta si degdeg ah aadna uga dalbataa inay tilmaan kusiiyaan. Ayadoo kuxiran xaaladaha iyo qiimaha hadiyada, waxaan kaacodsan karnaa inaad hadiyada dib uceliso si aad adeeg bixiyaha uga codsato inuu kuu fasaxo inaad sadaqo ahaan ubixiso.

SOODHAWAYNTA GANACSI, AYNA KUJIRAAN CUNTOOYINKA IYO BAASHAALKU, MAMNUUC MAAHA HADII DABIICADA IYO QAABKA MUNAASABADU AY TAHAY MID MACQUUL AH.

TARTAN CADAALAD AH

Waxaan kudhaqmaynaa sharciyada tartanka ama kalsooni la'aanta inta badan wadamada aan ganacsiga kuleenahay. Sharciyada noocaas ah waxaa loogu talagalay inay kor uqaadaan tartanka waana xeer noodagsan inaan si buuxda ugu dhaqano sharciyada tartanka ganacsi ee jira anagoo tixraacayna sharciyada goobaha aan kashaqayno. Kumilmida dadka tartanku nagala dhaxeeyo waa inaan kafogaanaa. Hase yeeshee, waxaan aqoonsanahy inay jiri karaan xaalado gaar ah oon isdhexgalka tartamayaasha aan laga fogaan karin sida shirarka warshadaha ama ururada ganacsiga. Markay jiraan xaaladaha noocaan ah, shaqaaluhu waa inay lahaadaan taxadar markay lahadlayaan ama isdhexgalayaan dadka tartanku nagala dhaxeeyo.

Sharciyada tartanka Cadaalada ah ayaa naga xarimaaya inaan heshiisyo lagalno shirkadaha nalatartamaaya taasoo keni kara in ganacsiga la afduubto. Tusaale ahaan hawlaha la mamnuucay waxaa kamid ah: jaangooynta qiimo gaar ah, xadidida cadadka wax soosaarka, kushubashada tartanka ganacsiga iyo qaybsiga suuqyada, macaamiisha, goobaha ganacsiga iyo goobaha shirkaduhu ka hawlgalayaan. In shiraduhu kuheshiiyaan xadidada wax soosaarka ama iibka ama inaysan macaamiil gaar ah wax ka iibin ama adeeg bixyaal gaar ah wax ka iibsan sidoo kale waa xaaraan. Heshiisyadu qasab maaha inay quman yihiin ama qoran yihiin si ay sharci daro unoqdaan.

Sharicyada tartanka cadaalada ah waa kuwo balaaran wayna kaladuwanaan karaan wadamada kaladuwan. Hadaad bixiso ama lagu siiyo macluumaad qarsoodi ah ama sir ah oo kusaabsan shirkad tartan nagala dhaxeeyo, waa inaad islamarkaba gaarsiisaa Sharciga. Eeg **Siyaasada U hogaansanaanta Aaminaad la'aanta**.

KAHORTAGALAALUUSHKA/MUSUQMAASUQA

Kahortaga, ogoonshaha iyo soosheegida laaluushka iyo musuqmaasuqu waa waajib saaran qofkasta oo ushaqeeya Shirkada. Waxaan doonaynaa inaan kalsooni iskuqabno shaqaalaheena iyo iskaashatadeena ganacsiga. Arintaan waxaan kuguulaysan karnaa markaan dhamaanteen udhaqano qaab hufnaan iyo sharaf leh anagoon kafiirinayn nooca cadaadiska degdega ah ee ganacsi oon waaji karno. Marna ma aqbalno laaluushka iyo hawlaha kale ee masuqmaasuqa ah.

Maqaadano mana bixino laaluush. Madifaacno mana aqbalno laaluush. Masamayno qarashaad hawl fududayn ah umana ogolaano dadka kale inay sameeyaan ayagoo anaga naga wakiil ah.

Qarash fududayn ah, oo mararka qaar looyaqaano "lacag laaluush ah" ama "lacag kasbasho ah" waxaa loobaxshaa si loo kasbado shaqo, hawlo aan toos ahayn sida soosaarista fasaxa, daarista tamarta ama biyaha, goobaha canshuuraha, fasaxida fiisooyinka ama siinta difaac booliis. Inkastoo qarashaadka noocaan ah ay yihiin caadooyin ganacsi oo iska caadi ah wadamada qaar, sidoo kale qasab maaha inay sharci daro yihiin wadamada qaar. Waxaa kaaxaaraan ah inaad lacag bixin hawl fududaysi ah samayso marka laga reebo inaad halis ugu jirto in lagu dilo, taasoo markaas laallus aad naftaada kufuranayso aad bixin karto, laakiin ay qasab tahay inaad kusoo sheegto Waaxda Sharciga, Anshaxa Caalamiga ah iyo U hogaansanaanta ama hanti dhowrka Gudaha.

Kumilmida Saraakiisha Dawlada Sharciyada laxariira isdhexgalka lala yeesho saraakiisha dawladu way balaaran yihiin waxayna ubaahan yihiin feejignaan dheeri ah. Isdhexgalkeenu waa inuusan saamayn kuyelan saraakiisha dawlada si loogu adeegsado darajada sarkaalka qaab ufaaiidaynaaya Shirkada. Sharciyada iyo xeerarka kadhanka ah musuqmaasuqa ayaa mamnuucaaya bixinta hadiyadaha, soodhawaynta, baashaalka iyo deeqaha dhanka safarka oo lasiiyo saraakiisha dawlada.

Hadiyadaha xasiiska ah oon aadka ubuurnayn, sida alaabaha ay kudhagan yihiin astaamaha Shikada ama astaan mid kamid ah badeecooyinkeena, waa lasiin karaa sarkaal dawladeed si ixtiraamid ah laguna dhiiri galinaayo wanaaga, laakiin hadiyadaha noocaas ah waa inay noqdaan muwo yar loomana siin karo si saamayn loogu yeesho wax talaabo ah ama go'aan ama in lagu helo faaiido aan xaq ahayn. Shirkada aya bixin karta qarashaadka macquulka ah ee laxariira

soodhawaynta, baashaalka iyo socdaalka marka qarashaadkaan loo adeegsanaayo xayiisiinta, bandhigda ama sharaxaada alaabaha ay Shirkadu soosaarto ama fulinta ama dadaalka heshiis. Hadii qarashaadka noocaas ah lasiinaayo saraakiisha dawlada, waa inuu waafaqsan yahay Sharciga ama Anshaxa Caalamiga ah iyo U Hogaansanaanta. Saaakiisha dawlada waxaa kamid ah:

- Nooc kaste oo kamid ah shaqaale ama sarkaal dawladeed, wakaalad wasaarad ama waax dawladeed (heerkuu rabo hajoogee)
- Qofkasta oo shaqo dawladeed haya (heer kasta oo uu joogaba)
- Sarkaal kasta ama shirkad kasta oo guud ama qayb kamid ah ay maamusho dawladu (tusaale ahaan, shirkad ay dawladu leedahay)
- Xisbi siyaasadeed ama sarkaal ushaqeeya xisbi siysadeed ama musharax utaagan xafiis siyaasadeed
- Sarkaal ama shaqaale katirsan urur dadwayne oo caalami ah sida Qaramada Midoowday
- Xubin katirsan qoyska hoos ee shaqsiyaadka kor kuxusan midkood

Waxaan kashaqaynaa wadamo badan oo aduunka kukala yaal waxaana suuragal ah inay dhacaan xiliyo ay sharciyada maxaliga ah iyo dhaqanadu iskudhacaan ama kahor imaadaan Xeerkeena iyo siyaasaadka Shirkada. Haddii aadan hubin nooca sharci, qaanuun, ama xeer ee aad raacayso, fadlan faahfaafin kaqaado **Xeerkeena Kadhanka ah**

Laaluushka/Musuqmaasuqa iyo/ama tilmaan kaqaado waaxda Sharciga ama Ilalinta Xeerka.

ISDHAAFSIGA GANACSIGA CAALAMIGA AH

Waxaan kudhaqanaa dhamaan qaanuunada maamula hawlaheena ganacsi ee aduunyada oo dhan. Shaqaalaha kulugta leh iibka, suuqgaynta, qaybinta ama rarida alaabaha, ayna kujiraan rarida aaladaha tignooloojiyada laysku mariyo, una kalagoosha daafaha xaduudaha aduunka waa inay bartaan sharciyada qabanaaya iyo xeerarka maxaliga ah ee laxariira xanibaadaha ganacsiga

A **laaluusha** Laaluush waa bixinta lacag ama "waxkasta oo qiimo leh" si markaas qaab aan sax ahayn saamayn loogu yeesho ama loo abaalmariyo go'aan ganacsi talaabo dawladu qaaday. Laaluush waxaa lagu bixin karaa "waxkasta oo qiimo leh," kuwaasoo ay kujiraan lacagta, fursado ganacsi, bixin dookh ama shruudo maslaxad gaar ah lagu wato, macluumaad sir ah, fursado shaqaalaysiin ah, ixsaan gaar ah, cuntooyin, safaro, baashaal (sida tigidh laguu siiyo inaad ku aado munaasabadah ciyaaraha), hadiyadaha ama deeqaha sadaqada ah.

caalamiga ah. Waxaa jiri kara marar la adeegsan karo sharci ka badan hal dal.

Maadaama aan nahay muwaadiniin aduunka oo dhan kasoo kalajeeda, waxaan kudhaqanaa dhaman cunaqabataynada dhaqaale iyo sharciyada kahortaga rabshadaha. Cunaqabataynta dhaqaale waa ganaaxyo lagusoo rogo hal wadan ama kabadan oo labeegsado, koox, ama shaqsiyaad. Cunaqabataynada waxaa kamid noqon kara noocyo kaladuwan oo xanibaado ganacsi ah, xadidaado iyo xadidaad lagsho dhaqdhaqaaqa dhaqaale. Waxaan kudhaqanaa dhamaan xanibaadaha naquseeya meelkasta oon ganacsi kasamaynaynaba. Waxaan sidoo kale kudhaqanaa sharciyada kadhanka ah cabashada kuwaasoo kamanuucaaya shirkadaha inay kaqabgalaan ama kubiiraan shaqo joojino gaar ah. Haddii aad hesho wax codsi ah oo lagaaga dalbanaayo inaad kaqaybgasho shaqo joojin shaqsiyaad, shirkadada ama wadan, la xariir Waaxda Anshaxa Caalamiga ah ama u Hogaansanaanta maadaama nalaga doonaayo inaan soosheegno codsiyada noocaas ah una gudbino laamaha sharciyada.

Waxaan kudhaqanaa dhamaan sharciyada mamnuucaaya lacagta suuqa madoow ama maalgalinta ujedooyin sharci daro ah. Magali karno isdhaafsi ganacsi kaasoo laxariira lacag lagu sameeyay falal danbiyeedyo sida khiyaanada ama argagixisada. Lacagta suuqa madoow waa qarinta asalka lacag si sharci daro ah lagu helay,

caadiyana lagu helay iskugu gudbinta lacagaha bangi shisheeye ama ganacsiyo sharci daro ah.

Xadgudubyada kadhanka ah mid kamid ah sharciyada qaybtaan lagu sharxay ee Xeerka waxay leeyihiin ganaaxyo adag oo dhanka madaniga iyo danbiyeed intaba iskugu jira kuwaasoo lagusoo rogi karo Shirkada iyo shaqaalaheeda labadaba. Waxaa intaas siidheer, sharciyadaan way balaaran yihiin xanibaadaha laxariira ganacsiyada caalamiga ahna way isbadalaan ayadoon badanaa lays ogaysiin. Hadaad wax su'aal ah kaqabto sharciyadaan, fadlan laxariir Waaxda Anshaxa Caalamiga ah iyo U hogaansanaanta isla markiiba.

ILAALINTA XUQUUDA AADANAHA

Maadaama aan nahay shirkad caalami ah, waxaan utaaganahay ilaalinta xaquuqda shaqsiyaadka. Waxaan fahansanahay in xushmad dadwaynaha ay tahay aasaas muhiim ah oo la xariira dhammaan hawlaheena iyo waxyaabaha aan qabano. Waxaan hawlaheena u fuliyaa si ku dheehan xushmada xaquuqda aadanaha iyo danaha shaqaalaheena sidoo kale waxaan xushmeenaa danaha sharciga ah ee qolyaha saddexaad ee aan xariirka la leenahay.

Waxaan kudhaqanaa dhamaan sharciyada la xariira mushaarka shaqada saacadlaha ah ee dhamaan goobaha aan ka hawlgalno. Waxaan

WAXAA NOODEGSAN XEER AAN MARNA QABLAYAN SHAQAALAYSIINTA CARUURTA EE QASABKA AH, SHAQAALE QASAB AH AMA DHOOFINTA DADKA BANII'AADAMKA AH.

aqoonsanahay xaq ay shaqaaluhu u leeyihiin xoriyada ururada gorgortanka wada jirka ah. Waxaa noodagsan xeer aan marna qablayan shaqaalaysiinta caruurta ee qasabka ah, shaqaale qasab ah ama dhoofinta dadka banii'aadamka ah. Waxaan kafilaynaa iskaashatadeena ganacsiga, oo ay kujiraan adeeg bixiyaasha, shirkadaha talada bixiya, qandaraasleeyda iyo qandaraasleeyda yaryar, inay raacaan dhammaan xeerarka caalamiga ah ee la aqoonsan yahay.

Tayada Alaabta
Suuq gayn Masuuliyad keh
Hawlaha Siyaasada
Dadaalka Dhanka Bii'ada
Kaqaybgalinta Bulshada
Xiriirka Banaanka (Baahinta Xogta)

Macaamiisha iyo Bulshada

WAXAAN SI WADA JIR AH OGA SHAQEYNAYNAA DADAALKEENA KU AADAN MACAAMIISHEENA IYO BULSHADEENA

Waxaan utaaganahay inaan macaamiisheena siino dookhyo leh damaanad, qiimo jaban iyo tayada ugu saraysa. Waxaan ku faanaa inaan taageerno aana nahay xubin firfircoon oo katirsan bulshada aan u shaqeyno aana ku dhexnool nahay.

TAYADA ALAABTA

Macaamiisheena waxay nagu aamineyn inaan si joogto ah usoo saarno alaab tayo sare leh dhamaan noocyada badeecooyinkeena. Shaqaalaha kashaqaynaaya hormarinta, qabashada, baakadaynta iyo xaraynta alaabaha waxaa laga doonayaa inay yaqaanaa heerarka, xeerarka iyo nidaamyada udagsan Shirkada kuwaasoo ku aadan alaabaha goobtooda lagu maamulo. Shaqaalaha waxaa sidoo kale laga filayaa inay raacaan nidaamyada wanaagsan ee wax soosaarka waana inay kudhaqmaan dhamaan sharciyada iyo xeerarka laxariira badqabka cuntada. Haddii aad aragto wax saameyn ku yeelan kara tayada iyo badqabka aalabaheena waxaa lagaa filayaa in isla markiiba aad usoo gudbiso mid kamid ah laamaha ku hoos qoran qaybta **Raadsashada Talada iyo Soo bandhigida Tabashada**. Waa inaan markasta hawlaheena ufulinaa qaab loogu talagalay in lagu ilaalsho sharafta iyo tayada alaabaha Shirkadu soosaarto.

SUUQ GAYN MASUULIYAD LEH

Waxaan kufaanaa badeecooyinkeena waxaana fahansahay muhiimada ay leedahay hufnaanta iyo islaxisaabtanku markaan samaynayno xayiisiinta iyo baakadaynta. Waxaan xaqiijinaa in barnaamijyadeena suuqgayntu waafaqaan sharciyada iyo xeerarka laxariira shaqada iyo sidoo kale xeerarka deegaanka.

HAWLAHA SIYAASADA

Qofkasta oo naga mid ah wuxuu xaq uleeyahay inuu taageero hawlihiisa siyaasadeed si iskiis ah, laakiin hawlahaas siyaasadeed waa inay kukoobnaadaan waqtigaaga iyo hantidaada. Wa inaanaan marna u adeegsan waqtiga Shirkada ama dhaqaalaheena hawlo siyaasadeed. Waa inaanaan kucadaadin shaqaalaha kale inay taageeraan ahdaaf gaar ah.

Maamulada iyo/ama gobalada qaarkood, in wax loogu deeqo musharixiinta maamul gobaleedka, gobalka ama xafiisyada maxaliga ah waa xaaraan. Majiraan deeqo Shirkadu leedahay oo labixin karo ayadoon Gudigga Agaasimayaashu fasax hore kubixin ama wakiiladoodu aysan fasixin.

ILAALINTA BII'ADA

Waxaan doonaynaa inaan ganacsigayga usamayno qaab kor uqaadaaya tayada bii'ada anagoo sidoo kale kobcinayna fayadhawrka bulshada an kadhex shaqayno. Qofkasta oo naga mid ah waxaa masuuliyad kasaaran tahay inuu niyada kuhayo iaalinta caafimaadka bii'adeena. Waxaan arintaan kuhirgalin karnaa anagoo:

- Kudhaqanka sharciyada laxariira bii'ada
- Soosheegida wixii xatooyo ah, faafin ah ama bixinta bilaa idinka ah
- Inaan kafoojignaano markaan adeegsanayno tamarta iyo biyaha
- Inaan kadalbano adeg bixiyaasha iyo iskaashatadena ganacsiga inay raacaan heerar gaar ah oo bii'ada udagsan
- Yool saarista taageerida iyo hormarinta hadafyada ay dejiyeen Guddiga Hagida Deegaanka, Bulshada iyo Maamulka.

KAQAYBGALIINTA BULSHADA

Shaqaalaheena iyo ganacsiyadeena ayaa galiya waqti, xirfad iyo dhaqaale siday gacan uga gaysan lahaayeen wax kabadalka bulshada aan ku dhex noolnahay aana kadhex shaqayno. Dadaalkeena ku aadan u adeegida bulshada kale waa qayb muhiim u ah ahaanshaha muwaadin masuuliyad leh waxayna kujiraan mabaadii'deena.

XARIIRADA BANAANKA SHIRKADA (BAAHINTA XOGTA)

Shaqaalaha ayaa lawaydin karaa su'aalo kusaabsan ganacsiyadeena ayna waydiin karaan dad kabaxsan Shirkada. Kaliya shaqaalaha hawshaas uxilsaaran ayaa kajawaabi kara codsiyadaas. Hadafka laga leeyahay isgaarsiinta dadwaynaha waa in dadka lasiiyo fariin sifiican loosoo diyaarshay, quman oo toosan. Shaqaale kasta waa inuu yaqaanaa **Xeerka Faafinta Macluumaadka Shirkada ee Guud ee u dagsan Shirkada**.

S+J

Su'aal: Waxaa isoo gaaray taleefan ay iisoo direen raadiye maxali ah ayagoo su'aalo iga waydiinaaya qiimaha dhanka nafaqada ee mid kamid ah cuntooyinkeena. Waan aqaanaa alaabtaada. Mawax saxan baa inaan ujawaabo qofka isoo wacay?

Jawaab: Maya. Kaliya shaqaalaha uxilsaaran ayay tahay inay ujawaabaan codsiyada banaanka ee kayimaada saxaafada. Sidoo kale waa muhiim inaad ogaato in qofka kusoo wacaaya uu qofkale iskadhigaayo si uu qaab tugnimo ah macluumaadka Shirkada ugu helo. U gudbi codsiga Waaxda Isgaarsiinta Shirkada ama hogaamiyaha Suuqgeynta ee ururkaada si loo bixiyo jawaab habboon.

Shaqaale ka ahaan, shaqadaadu waa inaad soo gudbiso tabashada. Hogaamiye bulsho ka ahaan, shaqadaadu waa inaad dadka dhageysato. Arrintaan ayaan sameynaa anagoo:

1. abuurayna bii'o aad ku dareemi karto deganaan iyo badqab si aad ugu tagto qof wax ka qaban kara walaacaaga

2. sameyneyna dhageysi naxariis leh iyo aruurinta xaqiiqooyinka guud ayadoon la gaarin wax xukun ah ama burinta tabashada

3. kaaga mahad celinayna ku dhiiranaanta arrintaan

4. waqtiga ugu habboon kula wadaageyna dhammaan xogta la aruuriyay ayadoo lagu saleynaayo ilaha ku habboon

5. marna sameyneyn wax aargoosi ah aan fiirineyn astaamaha aargoosiga ee dadka kale

Hadaad aragto ama maqasho wax aad isleedahay waa sharci daro ama waxay xadgudub kutahay Xeerka -- Soo Sheeg! Usoo sheeg walaacyada aad qabto maareeyahaaga ama kormeeraha, waaxda Shaqaalaha, Ilaalinta Xeerka, Sharciga, ama Laynka Cabashada ee Shaqaalaha.

Laynka Cabashada waxaa laga heli karaa si oonleen ah **www.postholdings.ethicspoint.com** ama taleefan ahaan adoo wacaaya nambarka hoose ee kuhaboon goobta aad joogto.

U ISTICMAAL LAYNKA CABASHADA SI AAD USOO SHEEGTO:

- Wax isdaba marinta dhanka xisaabta iyo xisaabinta
- Hawlaha soosaarida cuntada badqabka leh
- Laaluushka, khiyaanada ama kharashaadka sharci darada ah
- Halisaha dhanka badqabka iyo bii'ada
- Isku dhacyada maslaxada
- Xatooyo ama khiyaano
- Takoorka iyo xadgudubka
- Rabshada goobta shaqada (xaalad aan degdeg ahayn)

WADANKA	FURAHA WICITAANKA EE WADANKA	NAMBARKA LACAG LA'AANTA AHTOLL-FREE NUMBER
Canada		888-225-7389
China		400-600-0569
Ireland	00-800-222-55288	888-225-7389
Kenya		0800-211-172
Netherlands	0800-022-9111	888-225-7389
South Africa		080-020-4430
Spain	900-99-0011	888-225-7389
Switzerland	0-800-890011	888-225-7389
United Arab Emirates	8000-021	888-225-7389
United Kingdom	0-800-89-0011	888-225-7389
United States		888-225-7389

SHARCI DHAAFKA

In Xeerkaan Lagaa dhaafo wuxu ubaahanyahay fasax hore oo qoraal ah uuna soosaaro Madaxa Waaxda Ilaalinta Xeerka ama, xaaladaha qaarkood (ayna kujiraan agaasime ama maxada fulintu), Gudigga Agaasimayaasha. Hadii uu ubaahdo sharciga quseeya, qodabada laga dhaafaayo qofka si degdeg ah ayaa loofaafinayaa.

postholdings.com

Waaxda Anshaxa Caalamiga ah iyo U hogaansanaanta ayaa leh waajibaadka ugu wayn ee Ilaalinta Xeerka Anshaxa. Waaxada Anshaxa Caalamiga ah iyo U Hogaansanaanta waxay warbixinada usoo gudbisaa Gollaha Guddiga Hantidhowrka waxayna si dhaw ulashaqaynaysaa dhinacyada Sharciga, Xisaabinta Gudaha iyo Adeegga Shaqaalaha oo Wadajira iyo qayb kasta oo ganacsiga kamid ah si loo xaqiijiyo in Shirkada oo dhan looga dhaqmo Xeerka Anshaxa laguna taageero xeerarka iyo nidaamyada shirkada. Waaxda Anshaxa Caalamiga ah iyo U Hogaansanaanta waxaa lagula xariiri karaa email oo ah compliance@postholdings.com ama Post Maraykanka oo ah 2503 S. Hanley Road, Saint Louis, Missouri 63144.

Febraayo 2022